



CITY OF BUFFALO
 DEPARTMENT OF PERMIT
 AND INSPECTION SERVICES
 65 NIAGARA SQUARE, ROOM 324
 BUFFALO, NY 14202

BAR CODE
 FIRSTNAME LASTNAME
 1234 ADDRESS AVENUE
 BUFFALO, NY 14202



Gacaliye, Milkiilaha Guryaha Kirada ah,

Maadaama aad tahay milkiile guri kiro ah leh oo ka diiwaangashan Magaalada Buffalo, waxaa lagaga baahan yahay inaad qaaddo talaabooyin gaar ah oo aad ka dhigto guryahaaga inay noqdaan kuwo amaan ah. Marka loo eego Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada, carruurta ay soo gaarto sunta macdanta (lead) waxay si joogto ah u saameysaa noloshooda oo dhan iyagoo hoos u dhigaysa caqliga qofka, lumiya maqalka dhegaha, iyo naafanimo xag waxbarasho. Sunta macdanta "lead" waxaa badanaa keena boorka ka yimaada rinjiga sunta macdanta, badanaa guryaha kirada ah.

Magaalada Buffalo waxay ku faantaa inay noqoto rafiiq iskaashi la leh Mashruuca "Get Ahead of Lead", oo ah mashruuc lagu caawinayo milkiileyaasha guryaha inay raacaan shuruucda maxalliga ah iyo kuwa dowladda ee ka hortaga sunta macdanta "lead". Waxaan si xoogan kuugu dhiirigelinaynaa inaad booqato bogga internetka: www.getaheadoflead.org si aad wax badan uga sii ogaatid tallaabooyinka ay tahay inaad qaaddo si hantidaada u noqoto mid ka bed-qabta sunta macdanta "lead-ka". Akhri dhabarka dambe ee xaashidan si waxbadan uga sii ogaatid ilaha sunta macdanta ka imaato iyo sameey habdhaqanno amaan ah xagga sunta lead-ka.

Waad ku mahadsan tahay inaad qabatey qaybta doorkaada si ubadkeena u noqdo mid caafimaad iyo amaan ah

Si daacad ah

James Comerford
 Commissioner, Department of Permit and Inspection Services

